

# Ammaah bulsho



ESPOO  
ESBO

# Ammaah bulsho

Amaahda bulsho waxaa loogu talo galay dadka dakhligoodu hooseeyo iyo dadka baahida qaba ee reer espoo ah, kuwaasoo aan fursad u heliyeennin in ay helaan ammaah shuruudaheedu ay macquul yihiin sababo la xiriira rahaamad la'aan ama sumadeyn lagu sameeyay xagga ammaah qaadashada.

Cadadka ugu badan ee amaahdani waa 10.000 euro iyadoo waqtiga ugu badan

## AMMAAHDA BULSHO WAXAA LAGU HELI KARAA TUSAALE AHAAN

- Soo iibsashada waxyaabaha yar yar ee guriga u baahan yahay
- Kharashaadka ee daruuriga ah sida kharashaadka daryeelka caafimaadka.
- Dib u bixinta deymihii hore.

ee la bixin karo amaahda ay tahay muddo shan sano ah. Ammaahda ugu yar ee la heli karo waa 500 euro. Ammaahda waxaa dib loogu daalacanayaa iyadoo la tixraacayo nimaadka 12-ka bilood ee Euribor iyadoo aan daalacasho oo gaar ah loo raacaneyn macmiilka. Kharashaad kale oo dheeri ah oo ku lifaaqan ammaahda bulsho ma jiraan.

Ammaahda bulshada waa caawimaad ammaahdeed oo mid bulsho ah. Ma ahan mid saameyn ku yeelaneyso kaalmada dhaqaale ee ceyrta. Ammaahdani waxaa looga gol leeyahay in looga hortago in qofku galo go'doomis dhaqaale iyo deyn badan iyo in lagu dhiirogeliyo in qofku isku filnaado.

Macluumaad ku aadan kaalmada dhaqaale:

**[www.espoo.fi/toimeentulotuki](http://www.espoo.fi/toimeentulotuki)**



# Dalbashada ammaahda

Dalbashada ammaahda waxay u baahan tahay in qofku si shaqsi ah u booqdo xafiiska la talinta dhaqaalaha iyo deymaha, halkaasoo qiimeyn guud lagu sameynaayo xaaladaada. Waxaa qiimeyn lagu sameynayaa dhamaan deymahaagii hore, hantidaada, dhakhliga kusoo gala iyo kharashaadka lagama maarmaanka ah.

Waxaa lagu sameynayaa xisaabin dakhliga kusoo gala iyo midka kaa baxa iyadoo la tixgelinaayo kharashka nolosha, jidmarka, xanaanada caruurta, lacagaha masruufka iyo kharashaadka daryeelka caafimaadka. Sidoo kale waxaa laga reebayaa kharashaadka daruuriga ah ee nolol maalmeedka si la mid ah cadadda loogu talo galay shaqsiga ku jira qorshaha maareynta deynta. Tusaale ahaan shaqsiga kaligiis deggan kharashaadka daruuriga ah ee ku baxaya waa 540 euro bishiiba. Lacagtani waxaa ka mid tusaale ahaan cuntada, telefoonka iyo internetka iyo kharashaadka kale ee shaqsiyadeed.

Codsiga dalbashada ammaahda waa loo baahan yahay cadeymaha dakhliga kusoo gala, kharashka kaa baxa, hantida keydka kuu ah iyo wax kasta oo deyn ah ee laguugu leeyahay, sidoo kale deymaha daahay ee u gudbay heerka qasab ku bixinta iyo sidoo kale go'aan sanadeedka canshuurta, diiwaankaaga ammaah qaadasho, bayaan xisaabeedka bangiga muddo saddex bilood ah. Faahfaahin dhameystiran oo ku aadan lifaaqyada kale ee loo baahan yahay wuxuu helayaa marka uu qofku qabsado ballan.

Si ammaahda aad u hesho, waxaad u baahan tahay in aad awood u leedahay in aad dib u bixiso ammaahdaasi iyo in isla markaasi xaaladaada guud ahaan ay xalismato. Waxaa lagaa dalban karaa in aad hore lacag usii dhigato. Haddii ammaahdaasi laguugu ogolaado in dib u habeyn lagu sameeyo deymahaaga, siistamka xogta macaamiisha ee Finland waxaa lagu gelinayaa sumadda carqaladeynta ammaah qaadashada. Sumadeyntaasi waa in ahaataa mid shaqeyneysaa illaa inta deynta laguugu leeyahay.

Dib u bixinta ammaahda waxaa lagu salenayaa habka heshiiska kala bixista tooska. Ku guuldareysashada ama jebinta heshiiska dib u bixinta ammaahda waxay keeni kartaa burbur ku yimaada heshiiska iyo sidoo dib lagaaga soo celin lahaa ammaahdaasi.





## MAGAALADA ESPOO

ADEEGGA LA TALINTA DHAQAALAHA IYO DEYMAHA

**Telefoonka talobixinta iyo ballamaha:** isniin - khamiis, saacadda 10-12, telefoon 0800 9 3488, fax 09 8162 3499

**Cinwaanka goobta:** Itätuulentie 2 B, dabaqa 1-aad

**Cinwaanka:** PL 212, 02070 Espoon kaupunki

[www.espoo.fi/sosiaalinenluotto](http://www.espoo.fi/sosiaalinenluotto)

## BOOQO SHABAKADA OMATALOUS

Waxaad tusaale ahaan ugu gudbin kartaa su'aalo la taliyayaasha dhaqaalaha iyo deymaha shabakadda: [espoo.fi/omatalous](http://espoo.fi/omatalous)



[ESPOO.FI/OMATALOUS](http://ESPOO.FI/OMATALOUS)

